Usoo dhawaansha la’aan

MACLUUMADKAN OO IDIL WAAD KA DAALACAN KARTAA BOGAN XAGASHIISA KORE

Ujeedadda sharcigan usoo dhowaansha la’aantu waxay tahay in laga hortago oo la wanaajiyo si aysan u imaan arbshaad aan wanaagsaneyn. Macnaha usoo dhowaansha la’aantu waa, in qofka naftiisa, caafimaadkiisa, xoriyadiisa ama amaankiisa si loo sugo in laga mamnuuco inuu qofka markaa loo arko inuu intiisaas wax u dhimayo in laga siiyo usoo dhowaansha la’aan. Usoo dhowaansha la’aanta. Waa lagu xukumi karaa xitaa usoo dhowaansho la’aan markaa kuwo kuwada noolaa isku guri markii ka mamnuucaas lagu badbaadinayo mid kamid ah.

La cusbooneysiiyey 23.11.2012
Wasaaradda cadaaladda

Yaa codsan kara usoo dhawaansha la’aanta?

Badanaaba dhacdooyinka loo isticmaalo usoo dhawaansha la’aanta waa ninkaagii/ naagtaadii hore ama kulanoolahaagii hore oo loodiidaayo inuu kulasoo xiriiro ama inuu kuu yimaado ama qof qaangaara oo ku cadaadinaya waalidkii inuu lacag baada ka qaato. Usoo dhawaansha la’aanta waxay tusaale ahaan badbaadinaysaa markhaatiga.

Nidaamka qoys dhexdiis u yaala waa lagu salayn karaa usoo dhowaansha la’aan markii ay wada noloshahu aheyn mid nolol wadaqeybsi nin iyo naag ee siyaabo kale loowada nool yahay. U diidistuna waxay ahaan kartaa suurogal ahaan, markii waalidka lagu waxyeeleeyo oo uu dagaal wax uga doono ilmihiisoo qaan gaara oo kula nool guriga.

Usoo dhowaansha la’aan cid walbaa wey codsan kartaa, kuwaasoo si cad u dareemaya in ruux kale ku hayo hanjabaad iyo qashqashaadba.

Xitaa waxaa codsigga gayn kara xeerilaaliyaha, booliska iyo sooshalka mas’uuliyiintoodda haddii ay dhacdo in dhibanuhu kacabsanaayo sameynta codsigga ama uusan awoodin inuu sameeyo.

Sidee baa loo codsadaa usoo dhawaansha la’anta?

Haddii luguu hanjabay aadna u aragtid in ay kucaawinayso sharcigga usoo dhawaansha la’aantu waxaad talo ka heli kartaa mas’uuliyiinta sooshalka booliiska, xeerilaaliyaha ama ururadda iskaawax uqabsashadda.

Usoo dhawaansha la’aanta waxaa laga codsadaa booliska ama maxkamadda, codsigaas oo ah qoraal ama oraah. Codsigga markii aad codsanaysid waa in aad sheegtaa

- hanjabaadda ama khashkhashaadda aad lakulanta ama aad lakulmaysid waxay tahay
- yaa kuu hanjabaya ama ku khashkhashaya

- fikradda aad ka qabtid inta ay socon karto khashkhashaadaas ama heer uu gaaarsiisnaan karo danbigga ay keeni karto hanjabaadaas
- arintaas markhaati ama cadeymo ma leedahay.

Waa muhiim inaad qortid dhacdooyinku sii ay u dhaceen, kuna qortid codsigga waxaa kale oo codsigga kusoo qoreysaa markhaatiyaasha cinwaanadoodda iyo telefoonadoodda

Haddii nabar luguu gaystey u tag dhakhtar oo cadayn kasoo qaado (rifeeto). Dhakhso haddii loo baahdo.

Isla markaasba usoo dhowaansha la'aanta waxaa amri kara masuul dowli ah oo oo sharci u leh, sida taliyeyaasha booliiska, xeerilaaliyaha ama maxkamadda dagmada.

Usoo dhowaansha la'aanta qoyska dhexdiisa ayaa inta badan ah mid isla markiiba la dardargeliyo waxaana si ku meelgaar ah u go'aamiya booliiska. Taasina waa markii booliisku ka kexeeyaan hanjabaha qasiyada wada ka kaxeeyaan guriga ama ay xiraan taasoo dhibtii iyo hanjabaadiina u eg tahay mid sii soconeysa markii la soo daaya kadib.

Horudhaca usoo dhawaansha la'aanta

Aasaaska usoo dhawaansha la 'aanta qofka lugu xukumay in uu usoo dhawaan karin qofka kale lamana sooxiriiri karo iskumana dayi karo, korkana kama ilaalin karo.

Faseexa usoo dhawaansha la'aanta waxaa laga wadaa in deegamo qaar oo uu qofka amnigiisa lasugayo uu deegaan ku yahay inuusan tagi karin loo diidaha sida dhibanaha guriggiisa, shaqaddiisa ama guriga xagaa baxa iyo nawaaxigeedaba.

Usoo dhowaansha la'aanta qoyska dhexdiisa qofka lagu amrey waa inuu kabaxaa guriga reerkoo dhan ka dhaxeeya mana ku soo noqon karo xaafada. Mana la kulmi karo lamana soo xiriiri karo ruuxa markaa lagu sugayo amaankiisa usoo dhowaansha la'aanta. U diiditaanka waa ku jirtaa ina la dabo kaco ama koru u ka eegto ruuxaas laga mamnuucey inuu u soo dhowaado, sidoo kale u soo dhowaansha la'aanta qoyska dhexdiisana waa lagi dhigi karaa mid **baaxadeysan** taasoo ah meelaha kalee uu waqtiga ku qaadanayo tusaale gurigii ay wada dagenaayeen oo kale.

Usoo dhawaansha la'aanta waxaa loo fiiriyaa arinwalba dhacdadeedda. Marwalba waa jirtaa usoo dhawaansha la'aanta aan ka ahayn caruurta labadda qof kadhexeysey oo si kadis ah u jiratey.

Markii go'aanka lagaarayo waxaa lafiirinayaa dhacdooyinkii horay udhacay. Tusaale ahaan lakulanka caruurta ama hantidda kulamadoodda la xiriira waxaa loo xukumi karaa mas'uuliyiin sooshal ama dad kale in ay xaadir yihiin.

Usoo dhowaansha la'aanta qoyska dhexdiisa ma aha in lafara gashanayo labada dhinacba hantidooda ama waajibaadkooda (tus. bixinta kirada guriga). Lahaanshaha guriga ama heshiiska kirada ama qeybsashada alaabta. Usoo dhawaansha la'aanta go'aaminteyda wax shaqo kuma laha go'aaminta wada daryeelka caruurta, xaq u yeelashada la kulanka iyo masruufka. La kulmida caruurta waa in si gooni ah looga heshiiyaa.

Intey jireyso usoo dhowaansha la’aanta

Go’aanka maxkamadda degmada ee usoo dhawaansha la’aanta dhererkiisu waa ugu badnaa sanad, laakiin waa la kordhinkaraa haddii loobaahdo. Kordhinta waxaa loo baahan yahay in lacodsado sharaxdidna waxaana go’aanka soo gaaraya maxkamadda degmada.

Usoo dhowaansha la’aanta qoyska dhexdiisa waxaa la xukmin karaa ugu badnaa sadex bilood. Inta ay taasi jirtana waxaa loo xaqiijiyaa hadba sidey arrintu tahay. diidmadana haddii loo baahdo waa la cusbooneysiin karaa ugu badnaan sadex bilood.

Arrinta usoo dhawaansha la’aanta maxkamadda

Codsigga usoo dhawaansha la’aanta waxaa go’aan looga gaaraa maxkamadda codsiguna ha ahaado mid dagdag ah. Arintaana waxaa lugu falanqeeyaa maxkamadda sida danbiyada, waxaana lafalanqeeyaa arinta lugu andacoonayo iyadoo la dhagaysanayo labadda qof ee arintu kusaabsan tahay iyo markhaantigoodda.

Udhawaanshala’aanta markii la go’aaminaayo waxaa la eegayaa heerka danbigu iyo dhibtu gaarsiisan tahay, markii ladhagaysto sheekadda dhibanaha iyo markhaatiggaba.

Sababaha keeni kara usoo dhawaanshol a’aanta waxay noqon kartaa qalalaaso dhacay, laakiin marwalba ma sababto usoo dhawaansha la’aan. Sidoo kale haddii dhibanaha loogu hanjabay gurigiisa, shaqadiisa, ama meelaha lugu kulmo waxay noqon kartaa sabab dhibanaha loosiin karo usoo dhawaansha la’aan. Sidoo kale waxaa lamid ah haddii dhibanaha loogu hanjabo telefoon, waraaq iwm.

Sharuudaha culus ee usoo dhowaansha la’aanta qoyska dhexdiisa
In lagu waajibiyo ruux in laga saaro guriggisa ma aha arrin fudud oo waa mid aan yareyn in lagu dhaqaaqo markii loo fiiriyo u soo dhowaansha la’aanta dadyow aan meel kuwada nooleyn. Go’aaminta usoo dhowaansha la’aanta qoyska dhexdiisa waa iney jiraan sharuudo adag markii loo eego usoo dhowaansha la’aanta caadiga ee dadyowga kale. Go’aanka diidmada waa lagu gaari karaa oo keliya markey timaato, denbi u geesasho ama in looga hortagayo halisgelin naf, caafimaad, ama xoriyada qofka, mana aha haddii faldenbi ahaan loo geysto qashqashaad iyo deganaasho daro iney ahaan karto iyaduna denbi taasoo iyana keeni karto diidmo u soo dhowaansho la’aan.

Sidii maxkamadda loogu tusilaa dhibta in ay run tahay way adkaan kartaa. Haddii labadda qof qiran dhibtaa way wanaag sanaan lahayd in qof sadexaad arkaayo dhibtaas. Haddii mar hore aad lasooxiriirtay booliska ama sooshalkaagga way kucaawin kartaa markii arinta lageeyo maxkamadda. Markii lafiirinayo heer ay gaarsiisan tahay dhibta dhibanaha dhibtiisa wuxu kusoo gudbinkaraa cadayn dhaqtar, dhib teknikaal ah oo uu kaydiyay, markhaanti tusaale ahaan dariska ama dad aad meel kawadda shaqaysaan markhaantigooda.

Wixii caawimaad sharciyadda ah waxa kusiin kara sharciyaqaanka guud iyo qareenadda kale. Xafiiska caawimaadda cadaaladda waxaa ka ogaan kartaa inaad xaq uleedahay garyaqaan bilaash ah iyo inkale.

Haddii qofka laga andacoonayo uusan Imaan maxkamadda fadhig loobaajinmaayo go'aanka lagaarana wuu hirgalayaa oo waliba si dhakhso leh buu u hirgalayaa.

Haddii ay dhacdo mustaqbalka in laga kaaftoomo usoodhawaanshala 'aanta waxaa lugu burburinayaa go'aankii hore maxkamadda ee **labadda qof dhexdood kama heshiin karaan in go'aankii laga noqdo.**

Jabinta usoo dhawaansha la'aanta

Jabinta usoo dhawaansha la'aanta waa danbi waxayna leedahay abaalmarinteedda. **Xukunkeeduna wuxuu noqkaraa ganaax ama ugu badnaan hal sano oo xarig ah.** Jabintaana waxay hoos imaamaysaa xafiiska xeer ilaalinta guud, xafiiskaasna baa sharci jabiyaha maxkamadda lafuulaaya.

Usoo dhawaansha la'aantaas waxaa lagalinayaa diiwaanka booliska si markii caawimaad dagdaga loo baahdo laga hubiyo diiwaanka.

Booliska baa ilaalinaya usoo dhawaansha la'aanta qofkii jabiyana haddii loobaahdo way jajuubi karaan. Qofkii loo xukumo in aan loosoodhawaan karin badbaadadiisa waa lasugay markii booliska lawacdana sharci jabiyahana waa laxirayaa waana la waraysanayaa.

Sidatan suubi

- haddii dhib ama hanjabaa luguu gaystay laxiriir booliska
- waxaad kacodsan kartaa usoo dhawaansha la'aan kumeel gaar ah booliiska
- haddii ay jirin dhib dag dag oo wax qabad u baahan, waxaa talo waydiin kartaa sooshalka ama talo waydiinkartaa ururadda talooyinka
- adeegso oo la tasho qabiir hadaad u baahan tahay
- markii luguu ogolaado usoo dhawaansha la'aanta kafakar in aad u baahan tahay sidaad u siiyadin laheyd taxadarkaaga tusaale inaad madasho sakatuurada gurigga iwm.
- kataxadar in aan lajabin sharcigga usoo dhawaansha la'aanta
- **haddii lajabiyo sharcigaas usoo dhowaansha la'aanta si dhakhso ah ugu sheeg booliska**
- **hakacabsan badbaadadda adigga iyo qoyskaagga!**

Lambarka booliska 112

Latalinta iyo caawimaadka

Mas’uuliyiintaan dowladeed baad kahelikartaa talo iyo hagidba oo kusaabsan usoodhawaanshala’aanta.

- mas’uuliyiinta booliska:kuugu dhow
http://www.poliisi.fi/poliisi/home.nsf/pages/0C8BF3843A3BDD28C2257530002EC9AC?opendocument

- mas’uuliyiinta sooshalka kuugu dhow: La xiriir deegaankaad ku nooshahay degmadiisa adigoo sida alifbeedka u kala horeeya uga eegaya degmadaada ciiwankan:
http://www.kunnat.net/fi/Yhteystiedot/kunta-alan-yhteystiedot/kunnat/Sivut/default.aspx

Hay’adahan hoose ayaa ku siinaya talo iyo tusmaba oo usoo dhawaansha la’aanta:

- Guriga badbaadada kuugu dhow **www.turvakoti.net**
https://www.turvakoti.net/site/?lan=1&page_id=8

Heeganka masiibooyinka denbiga **www.rikosuhripaivystys.fi**
Caawimo teleefon **0203 16 116** isniin - talaado 13-21, arbaco - jimco 17-21
Talo qareen tel. **0203 16 117** isniin - khamiis17-19

Xarunta kufsigga caawimaada Dumarka
www.tukinainen.fi
www.nettitukinainen.fi
Heeganka mushkilooyinka tel. **0800 97899** isniin - jimce 9-15
sabtida – axadaha iyo **maalmaha feystooyinka** 15 – 21
Heeganka qareenka tel. **0800 97895** isniin – khamiis 13 – 16

- Qadka dumarka: **www.naistenlinja.fi**